

# Farriin Ku Saabsan Doorshada Dadban Ee 2016

Duruufaha iyo xaaladda adag ee dalku ku sugan yahay, suurtagalma aha in doorashooyin qof iyo cod ah ay dalka ka dhacaan waqtigan. Taa beddelkeeda waxaa la qaatay hannaan doorasho dadban si loo fududeeyo kaqaygalka doorshada ee muwaadiniinta, kolka la barbar dhigo hannaankii doorashada lagu galay 2012. Hannaankan doorashada dadbani waxaa uu u gogolxaarayaa doorashooyin qof iyo cod ah oo dalka ka dhaca 4 sano kadib sannadka 2020.

Waxaa la xuli doonaa wadar dhan 14,025 eregey oo dooran doona xildhibaanada Aqalka Hoose ee Baarlamaanka Soomaaliya. Eergeydaasina waxaa soo xulidoona Odey-dhaqameedyada 135 ka ah oo la tashanaya nabadoonnada/cuqaasha matalaya jifi hoosaadyada beesha Leh kursi baarlamaan. Taasina waxay kordhinaysaa fursadaha ka qaybalka dadweynaha ee doorashadan dadban.

275-ta kursi ee Aqalka Hoose, kursigiiba waxaa loosoo xulayaa ergo codeeyayaal ah. Kursigii baarlamaanna waxaa dooranaya ergo dhan 51 oo rag, haween iyo dhallinyaro ka kooban .

**Guntanka ama kooramka fadhiga iyo codeynta ergada ka kooban 51ka xubnood wuxuu ku ansaxaya markii ay goobjoog yihiin oo ay codeeynayaan ugu yaraan 41 xubnood oo u dhiganta 80% tirada guud ee ergada.**

**Kursigii baarlamaan waxaa u tartami kara ugu yaraan labo (2) murashax. Musgarrax kastana waxaa laga rabaa in uu buuxiyo shuruudahan:**

- ✓ In uu yahay muwaadin Soomaali ah
- ✓ In uu ka mid yahay beesha iska leh kursiga uu u tartamayo,
- ✓ In aan da'diisu ka yarayn 25 sano, dhimirkiisuna dhan yahay
- ✓ In uu haysto shahaadada dugsiga sare, ama waayo aragnimo u dhiganta,
- ✓ In aan aan xuquuqdiisa muwaadinnimo go'aan maxkamadeed lagu hakin shantii sano ee u dambaysay,
- ✓ In uu saxiixo **"Xeerka Anshaxa Murashaxiinta"**
- ✓ *in uu codsiga Murashaxnimada ku soo gudbiyo waqtiga loo qabto, soona raaciyo laba sawir oo ah cabbirka baasaboorka.*
- ✓ *In uu bixiyo khidmadda diiwaangelinta musharraxa, keenana caddeynta lacag bixinta oo dhan 5000 oo dollar oo laga doonayo musharraxa lab ee u tartamaya Aqalka Hoose, halka gabadha musharraxa ahna laga rabo in ay bixiso 2500 oo doollar.*

*Musharraxa lab ee u tartamaya Aqalka Sare waxaa isaga laga doonayaa toban kun (10,000) oo dollar halka gabdha u sharraxan Aqalka Sare iyada laga rabo shan (5000) oo doollar*

**ERGEYGA DOORANAYA XILDHIBAAN AQALKA HOOSOW, QOFKA AAD DOORANAYSID U EEG SIFOONYINKA WANAAGSAN EE UU DHEERYAHAY KA KALE EE LA TARTAMAYA, ADIGA OO AAN U EEGIN XIGAALNIMO IYO DAN GAAR AH. QOFKA AAD DOORANAYSID WAA XILDHIBAAN QARAN, EE U FAKAR SIDII MUWAADIN QARAN. GO'AANKA AAD QAADATO MAALINTA DOORASHADU WAA GO'AAN MASIIRI AH OO MUSTAQBALKEENA SAAMEYN DOONA.**

